# XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

**WARSAXAAFADEED 10/2014**

## Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya oo cambaayeeray colaadda ka aloosan Baydhabo

**Muqdisho/Addis Ababa,** 24 Maarso 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud (SRSG) u qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Kay, ayaa cambaareeyay dilka arxan darrada ah ee loo geystay siddeed ka mid ah odayaasha dhaqanka oo shalay lagu dilay Gobolka Baay ee Soomaaliya iyo weliba colaadda ka dhalay magaalada Baydhabo una dhexeya taageerayaasha hindiseyaasha kala duwan ee dhisidda maamul-goboleedyada.

Odey dhaqameedyadu waxay magaalaada Baydhabo kaga qaybgalayeen shirka dhisidda maamul-goboleedka, markaa ka dibna Al-Shabaab ayaa si gaadma ah u dilay, sida ay sheegtay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

"Waxaan cambaareynayaa dilalkan arxan darrada ah, waxaana tacsi tiiraanyo leh u dirayaa qoysaska iyo bulshada ay ka dhinteen odey dhaqameedyada", ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Kay, isagoo isla markaana ku baaqay in si buuxda loo baaro weerarkaas iyo in kuwa ka dambeeyana si degdeg ah maxkamad loo soo taago. "Waxaan dhammaan dhinacyada is haysta xusuusinayaa inay isdejiyaan oo ay isxakameeyaan, iskana ilaaliyaan falalka dadka kiciya oo amaanka khatar gelin kara, xasillooni darra kalena keeni kara", ayuu sheegay Ergeyga Gaarka ah Kay.

Isagoo horaantii maanta magaalada Addis Ababa kula hadlaya Golaha Nabadda iyo Amaanka Midowga Afrika, Ergeyga Gaarka ah Kay wuxuu ku baaqay in Dowladda Federaalka ay si degdeg ah ugu soo jeesato una hogaamiso hanaanka nabad-dhisidda. "Waxaa lagama maarmaan ah in dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso ay si degdeg ah u kulmaan si ay wax uga qabtaan arrimaha Baydhabo una taageeraan hanaan nabad ah oo maamul-goboleed lagu sameeyo oo ay hoggaaminayso Dowladda Federaalka." Wuxuu soo dhoweeyay qorshaha ay Dowladdu soo jeedisay oo ah in si degdeg ah la isugu keeno madaxda siyaasadda iyo kuwa dhaqanka ee ka kala socda dhammaan dhinacyada si ay wadatashi degdeg ah u yeeshaan. "UNSOM waxaa ka go'an inay taageerto dadaalka ay Dowladdu waddo, wuxuuna si dhow ula shaqayn doonaa bulshada caalamka, gaar ahaan Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOOM), Urur-Goboleedka IGAD iyo Midowga Yurub (EU), si horey loogu sii dhaqaajiyo hanaanka dibuheshiisiinta iyo dhisidda dowlad-goboleedyada", ayuu raaciyay.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

**Fadlan eeg rugta Internet-ka:**
**www.unsom.unmissions.org**

**@UNSomalia** **facebook.com/UNSomalia**